# QAYBTA KOWAAD
# SHARCI

**Sharci lambar 19, taariikh 9 Maajo 1987**
**Sharciga Maalgelinta Shisheeye.**

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAYA

Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad
*(Maalgelinta Shisheeye)*

Marka Sharcigan laga hadlayo, "Maalgeliye Shisheeye" waxaa loola jeedaa: qof kasta ama hay'ad kasta oo shisheeye oo leh aqoonsi sharciyeed.

Qod. 2aad
*(Maalgelin Shisheeye)*

Maalgelin shisheeye waxaa ah:

1. Lacag adag oo lagu warejiyo dalka kana mid ah lacagaha sarrifma ee qalaad ee uu cayimay Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed;

2. Makiinado, qalab, dayactir, dhismooyin iyo alaab kasta ee kale oo sida Sharciga Keenidda waafaqsan lagu keenay;

3. Mulkiyadda summadaha ganacsiga iyo rukhsooyinka lagu soo wareejiyo dalka ee loogu baahdo hawlaha lagu fulinayo maalgelinta la soo jeediyey;

4. Kharajka daraasado iyo qoraallo farsamo ee loo diyaariyey ama la xiriira maalgelinta la oggolaaday;

5. Macaashka ka dhasha maalgelinta shisheeye ee loo oggolaaday, waafaqsanna sharcigan ee dib loo geliyey. Maalgelinta kor ku xusan waa mid lagu sameeyey mashruuc ama lagu ballaarinayo mashruuc si sharciga waafaqsan uga diiwaangashan dalka.

Qod. 3aad

*(Guddiga Maalgelinta Shisheeye)*

1. Guddiga Maalgelinta Shisheeye oo hadda wixii ka dambeeya la oran doono "Guddiga" wuxuu leeyahay awoodda ugu sarreysa ee go'aan ka gaaridda dhammaan arrimaha la xiriira maalgelinta shisheeye ee lagu samaynayo dalka. Guddiga fadhigiisu wuxuu noqonayaa xarunta Wasaaradda Qorsheynta Qaranka oo uu ku kulmi doono ugu yaraan laba jeer bashiiba.

2. Guddigu wuxuu ka koobnaanayaa:

   1. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Qorsheynta Qaranka,
   2. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda;
   3. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Maaliyadda;
   4. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Warshadaha;
   5. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Ganacsiga;
   6. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Lacagta;
   7. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga;
   8. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda ay hoos imaaneyso mas'uuliyadda maalgelinta shisheeye ee markaas laga hadlayo, marka laga reebo Wasaaradaha kor ku xusan;
   9. Agaasiamaha Guud ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed;
   10. Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga , Warshadaha iyo Beeraha, waxaana Shir-guddoomiye u noqonaya Guddiga Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Qorsheynta Qaranka.

Qod. 4aad

*(Hawlaha Guddiga)*

Hawlaha guddigu waxay noqonayaan sida soo socota:

1. Oggolaashaha maalgelinta shisheeye ee la soo jeediyey asagoo raacaya tilmaamaha siyaasadeed ee ku xusan qod. 7aad ee sharcigan.

2. Oggolaashaha diiwaangelinta maalgelinta shisheeye.

3. Dib-u-eegidda diiwaangelinta maalgelinta shisheeye ee horey loogu sameeyey sharciyadii maalgelinta dibadeed ee jirey, si maalgelintaas uga faa'iideysato axkaanta u daneyneysa ee sharcigan sida ku cad qodobkisa 21aad.

4. Goynta qiimaha maalgelinta shisheeye ee waafaqsan qod. 2aad, xubnaha 2, 3, iyo 4 ee sharcigan.

5. Xaqiijinta waafaqsanaanta axkaanta qod. 16aad ee ku saabsan amaah ka qaadashada ilaha gudaha.

6. U fududeynta siinta rukhsooyinka dal-ku-joogga shaqaalaha shisheeye ee ay qoranayaan shirkadaha shisheeye ee ku diiwaangashan sharcigan.

7. Gudashada hawl kasta oo kale oo la xiriirta maalgelinta shisheeye ee waafaqsan sharcigan.

Qod. 5aad
*(Fadhiyada iyo go'aannada Guddiga)*

Fadhiga Guddigu wuxuu ku ansaxayaa marka ay ka soo qayb galaan ugu yaraan 7 xubnood oo uu ku jiro Guddoomiyuhu. Go'aannada Guddigu waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah.

Qod. 6aad
*(Xafiiska Dhiirrigelinta Maalgelinta Shisheeye)*

Xafiiska Dhiirrigelinta Maalgelinta Shisheeye oo hadda iyo wixii ka dambeeya la orn doono "Xafiiska" wuxuu yahay xafiiska maamulka iyo horumarinta ee guddiga gacan ku siinaya gudashada hawlihiisa. Hawlaha xafiiskuna waxay yihiin:

1. meelmarinta go'aannada guddigu gaaro;

2. soo jeedinta nidaamka iyo hab maamuleedka looga baahan yahay dhaqan gelinta sharcigan;

3. siinta maalgelinta shisheeye macluumaadka iyo talooyinka la xiriira arrimaha ay ka midka yihiin codsiga iyo diiwaangelinta ee uu sharcigan dhigayo, nidaamka ganacsiga dibedda, fursadaha maalgelineed, qaab dhismeedka hay'adaha, ilaha gudaha ee laga heli karo amaah lacageed, wadaag maalgelineed;

4. ka kaalmeynta maalgeliyaha shisheeye buuxinta shuruudaha la xiriira qaddimadda codsiga maalgelineed;

5. gacan ku siinta maalgelinta shisheeye ee la oggolaaday ee ku jira heer abaabul iyo dhismo asagoo u fidinaya talo iyo tusaale ku saabsan hay'adaha Dastuuriga ee ku shaqada leh, waddooyinka loo marayo iyo habraaca maamuleed ee la xiriira;

6. soo jeedinta talooyinka la xiriira siyaasadda iyo hagaajinta jawiga maalgelinta shisheeye;

7. horumarinta iyo soo dhaweynta maalgelin shisheeye oo hor leh asagoo la kaashanaya hay'adaha kale ee ku shaqada leh maalgelinta;

8. gudashada hawl kasta oo la xiriirta maalgelinta shisheeye oo uu guddigu u xilsaaro.

Qod. 7aad

*(Mudnaanta maalgelinta iyo qaybaha)*

b) lagaga faa'iideysanayo cududda dadka iyo kheyraadka dalka;

t) keeneysa farsamo cusub oo ku habboon duruufaha dalka;

j) abuurid dakhli cusub ama baajineysa lacag adag oo ku tim id dhoofin badeeco cusub ama beddesha kuwo dibedda laga keeno ama adeeg hawleed;

x) ka qayb qaadaneysa isu-dheellitirka horumarinta dhaqan-dhaqaale ee gobollada, gaar ahaanna dhinacyada:

i) beeraha;
ii) xoolaha;
iii) kalluunka;
iv) macdanta;
v) warshadaha;
vi) horumarinta dalxiiska;
vii) wax soo saar ama adeeg taageeraya ama dhiirrigelinaya horumarinta qaybaha kor ku xusan.

Qod. 8aad

*(Habka qaddimaadda codsiga diiwaangelinta maalgelinta shisheeye)*

1. Maalgeliyaha shisheeye wuxuu codsiga ku soo qaddimayaa foomka loo yaqaan "**Codsiga Diiwaangelinta Maalgelinta Shisheeye**" oo laga helo Xafiiska Maalgelinta Shisheeye ee ku yaal Wasaaradda Qorsheynta Qaranka asagoo lagu soo ridayo warqad sajilan oo ku socota "Guddiga Maalgelinta Shisheeye" ee laga helo Wasaradda Qorsheynta Qaranka, Muqdisho, Soomaaliya.

2. Maalgeliyaha shisheeye wuxuu arjiga si toos ah u keeni karaa xafiiska oo siin doona caddeyn ka qabasho.

3. Xafiisku wuxuu hubinayaa dhammeystirnaanta arjiga, haddii uu weydiisto codsaduhu. Wuxuuna siinayaa caddeyn muujineysa in uu buuxiyey shuruudaha maalgelinta.

Qod. 9aad

*(Shuruudaha iyo habka oggolaanshaha)*

1. Muddo lixdan casho gudaheed, laga bilaabo maalintala qabtay arjiga maalgelinta ee dhammeystiran, guddigu wuxuu go'aanka ku ogeysiinayaa codsadaha warqad sajilan. Haddii uu codsaduhu doorto, waxaa xafiiska toos uga qaadi kara qof wakiil ka ah oo caddeyn laga reebo inuu qaaday go'aanka.

2. Haddii ay dhacdo in wax laga beddelo arjiga codsiga, guddigu wuxuu isbeddelkaas ku ogeysiinayaa codsadaha warqad sajilan ama waxaa toos xafiiska uga qaadi kara qof ka wakiil ah.

3. Guddigu asagoo u marinaya xafiiska ayuu ku wargelinayaa maalgeliyaha oggolaashaha maalgelinta shisheeye, sagoo isla mar ahaantaana siinaya shahaaho loo yaqaan "**Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Mashruuca la oggolaaday**". Oggolanshahaas wuxuu maalgeliyuhu u suuragelinayaa diiwaangelinta maalgelinta.

4. "Shahaaddada maalgelinta Mashruuca la oggolaaday" waxay ku eg tahay muddo 18 bilood ah laga bilaabo maalinta la soo saaray. Muddadas gudaheeda, codsaduhu waa in uu dalka ku soo wareejiyaa hantida ku tilmaaman qod. 2aad, xubnaha 1, 2, 3 iyo 4. Haddii muddadaas la dhaafo, guddigu wuxuu siin karaa, haddii uu weydiisto codsaduhu, muddo dheeraad ah, ama uu weydiinayaa arji cusub.

5. Maalgelinta shisheeye ee ku xusan qod. 2aad, xubnihiisa 1, 2, 3 iyo 4 ee lagu kordhiyo mashruuc horey loogu sameeyey maalgelin diiwaan-gashan waxa uu u baahn ayahay qaddimaad codsi iyo oggolaansho, sida ku cad qod. 8aad, xubnihiisa 1, 2, 3 iyo 4 ee qodobkan.

Qod. 10aad

*(Shuruudaha iyo habka diiwaangelinta)*

1. Guddigu wuxuu diiwaangelinayaa maalgelinta isla marka uu maalgeliyuhu Soomaaliya soo geliyo hantida ku xusan qod. 2aad, xubnaha 1, 2, 3 iyo 4 ee waafaqsan qodobbada iyo shuruudaha ku qoran "Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye" ee mashruuca la oggolaaday. Si taasi u saaragasho, guddigu wuxuu maalgeliyaha shisheeye siinayaa shahaaddo loo yaqaan **"Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaangashan".**

2. Haddii dalka lagu soo wareejiyo hantida ku susan qod. 2aad, xubnihiisa 2, 3 iyo 4, guddigu wuxuu ku tallaabsanayaa diiwaangelinta isla marka uu xaqiijiyo qiimaha uu maalgeliyaha shisheeye ku sheegay hantida uu dalka ku soo wareejiyey ay tahay qiimaha dhabta ah ee suuqa. Guddigu wuxuu maalgeliyaha shisheye weydiisan karaa inuu keeno caddeymo qoraal ah oo muujinaya qiimaha hantida uu dalka ku soo wareejiyey. Haddii hantida lagu soo wareejiyo sida ku xusan xubinta 2aad ee qod. 2aad, qiimahaas waxaa loo goynayaa si waafaqsan shuruucda keenista badeecadaha dibedda.

3. Maalgelinta shisheeye waxa lagu diiwaangelinayaa lacah ka mid ah lacagaha qalaad ee sarrifmi kara ee uu caymiyey Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed.

Qod. 11aad

*(Dib-u-gelinta macaashka)*

1. Macaash waxaa loola jeedaa dakhliga saafiga ah ee laga jaray cashuurta ku waajibtay ee waafaqsan shuruucda canshuuraha dalka.

2. Macaashka ka dhashay maalgelin si sharci ah u diiwaangashan waxaa dib loo gelin karaa isla mashruucaas ama mashruuc kale ayadoo loo raacayo qodobbada iyo shuruudaha sharcigan dhigayo.

3. Marka macaashka noocaas ah dib loogu gelinayo mashruuca, waa in lagu wargeliyaa guddiga warqad sajilan ama si toos ah loogu geeyaa asagoo laga qaadanayo caddeyn hubal helid.

4. Guddigu wuxuu ku diiwaangelinayaa macaashka dib loo geliyey lacagta sarrifmeysa ee ku cayiman "Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaangashan". Cadadka lacagta waxaa lagu goynayaa si waafaqsan shuruudaha iyo nidaamka u degsan sarrifka lacagaha qalaad.

5. Si taasi u suurtowdo, guddigu wuxuu bixinayaa **"Shahaad-dada Dib-u-maalgelinta Macaashka Diiwaangashan".**

6. Wixii wareejimo dambe iyo dibad u saarid raasumal ama macaashka kale ah ee uu oggol yahay sharcigani waxaa lagu saleynayaa maalgelinta asalka ahayd ee diiwaangashaneyd oo lagu daray macaashka dib loo geliyey mashruuca.

7. Haddii ay dhacdo in macaashka dib loo geliyo mashruuc ka duwan mashruuc lagu sameeyey maalgelin shisheeye oo si sharci ah u diiwangashan, waxaa lagu dhaqayaa arkaanta qodobbada 8 iyo 9 ee sharcigan.

Qod. 12aad
*(Wareejinta Macaashka)*

1. Macaashka ka dhasha maalgelin si sharciga ah u diiwaangas-han, sida ku cad xubinta 1aad ee qod. 11aad, si xor ah ayaa dibedda loogu wareejin karaa.

2. Haddii macaashkaasi in ka mid ah loo wareejiyo dibedda, maalgeliyaha shisheeye wuxuu haraaga macaashkas wareej-isan karaa sanooyinka xiga.

Qod. 13aad
*(Dib-u-la-noqoshada Maalgelinta Shisheeye)*

1. Maalgelinta shisheeye ee sida sharciga ah u diiwaangashan ee isugu jirta maalgelintii asalka ahayd iyo macaashkii dib loo geliyey, waxaa dibedda looga saari karaa shan sano kaddib marka laga bilaabo maalinta la diiwaangashay maalgelinta asalka ah ee ku cayiman "Shahaaddada Maalgelinta Shis-heeye ee Diiwaangashan".

2. Guddigu wuxuu soo gaabin karaa ama dheereyn karaa mud-dada ku xusan xubinta 1aad ee qodobkan, asagoo tixgelinaya mudnaanshaha ku cad tilmaamaha siyaasadeed ee uu qorayo qod. 7aad, xubinta 1aad ee sharcigan.

3. Waxaa maalgelinta dib loogu qaadanaya lacagtii qalaad ee asalka ahayd ee ku cayiman "Shahaaddada Maalgelinta Shis-heeye ee Diiwaangashan"; lacagta loo wareejinayo dibedda waa in ay tahay mid ka dhalatay iibinta hay'ad aqoonsi sharci leh ama dad. Maalgeliyaha shisheeye wuxuu awood u leeya-hay in uu dibedda u wareejsito hantida maguurtada ah ee maalgelinta mashruuca, haddii uu doorto.

4. Haddii lacagta ka soo baxday iibka hantida maguurtada ah ay ka badato maalgelintii asalka ahayd ee lagu daray macaashka dib loo geliyey ee diiwaangashan, maalgeliyaha shisheeye wuxuu xor u yahay dibad u wareejinta farqiga, asagoo raacaya shuruucda canshuuraha ee jira iyo qawaaniinta sarrifka laca-gaha qalaad.

Qod. 14aad

*(Wareejinta mulkiyadda maalgelinta Shisheeye iyo shuruucda ogeysiinta*

1. Wareejinta mulkiyadda malgelinta shisheeye waxay ku imaaneysaa iibin ta hantida maguurtada ah ama u wareejinta saamiyaasha mashruuca la maalgeliyey qof ama hay'ad aqoonsi sharciyeed leh.

2. Haddii maalgelin lagu wareejiyo deggane aqoonsi sharci leh, ama qof Soomaaliyeed, wareejiyaha waxa ka joogsanaya wixii xuquuq ahaa ee uu ku heli jirey maalgeliye shisheeye.

3. Wareejiyaha iyo lagu-wareejiyaha waxaa qasab ku ah inta aaney la kala wareegin maaliyadda in ay soo wargeliyaan guddiga ayagoo soo raacinaya qoraallada iyo dukumenti taag-eeraya kala wareejinta.

4. Ku wareejinta maalgelinta shisheeye maalgeliye shisheeye oo kale uma baahna oggolaansho cusub sida ku xusan qod. 9aad ee sharcigan, balse waxa ay tahay in guddiga la wargeliyo sida xubinta 4aad ee qodobkan dhigeyso.

Qod. 15aad
*(Dhiirrigelinta Maalgelinta)*

1. Maalgelinta shisheeye waxaa la siinayaa dhiirrigelin iyo tas-hiilaad waafaqsan shuruucda jirta ee la xiriira tas-hiilaadka.

Qod. 16aad
*(Xadka amaah ka qaadashada ilaha gudaha)*

1. Mashruuc kasta oo la geliyey maalgelin shisheeye si sharci ahna loo diiwaangeliyey wuxuu amaah ka qaadan karaa hay'a-daha lacagta ee gudaha ilaa xadka uu gooyey Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed, asagoo guddiga kala tashaday.

2. Lacagaha laga helo amaahdii laga qaatay hay'adaha lacagta ee gudaha waxaa loo isticmaali karaa oo keli ah fulinta hawsha ku cayiman "Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaan-gashan". Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu hubiyo in sidaas loogu dhaqmay.

Qod. 17aad
*(Tas-hiiladka Shaqaalaha Shisheeye)*

1. Guddigu wuxuu hubinayaa in Hay'adaha Socdaalku u fudu-deeyaan helitaanka rukhsadaha Dal-ku-joogga iyo deggan-aanshe shaqaale shisheeye ee uu qorto mashruuc ku diiwaangashan sharcigan iyo xaasaskooda.

2. Guddigu waxa kale ee uu hubinayaa in shaqaalahaas iyo xaas-askooda loo oggolaado marka ay uga baahdaan sabab shaqo in ay tagaan goob kasta oo Soomaaliya ka mid ah ee uusan sharcigu mamnuucayn.

3. Shaqaalahaas waxay awood u leeyihiin in ay dibedda u xawis-haan 50% mushaarkooda iyo gunnooyinkooda.

4. Mashruuc kasta oo lagu diiwaangeliyey sharcigan, wuxuu qoranayaa Shaqaalaha Soomaaliyeed ee leh aqoonta iyo xirfa-daha looga baahan yahay shaqada. Maalgelinta shisheeye waxay tahay mid ka qayb qaadanaysa u soo wareejinta dalka aqoonta farsamo iyo maamul ee kor loogu qaadayo aqoonta xirfadeed ee ka jirta dalka.

Qod. 18aad

*(Damaanadda Maalgelinta Shisheeye)*

1. Mashruuc lagu sameeyey maalgelin shisheeye waxaa la siin doonaa tas-hiilaad la mid ah kuwa la siiyo mashaariicda waddaniga.

2. Mulkiyadda maalgelinta shisheeye ee sida qaanuunka loogu diiwaangeliyey Sharcigan lalama wareegi karo haddii aysan khasbin dan guud oo aan si kale loo xallin karin.

3. Haddii ay dhacdo in lala wareego hantida maalgelinta shisheeye, waxaa dhakhso loo bixinayaa magdhow u dhigma. Magdhowgaas wuxuu noqonayaa mid la mid ah hantida maguurtada ee lala wareegay ama u dhiganta qiimaheeda suuqa. Magdhowgaas la bixiyey si xor ah ayaa loo wareejisan karaa.

Qod. 19aad

*(Xallin khilaafaadka)*

1. Khilaafaadka maalgelineed ee ka dhasha meelmarinta Sharcigan waxaa lagu xallinayaa:
   b) hab saaxiibtinnimo oo lagula heshiiyey Maalgeliyeyaasha;
   t) ama, haddii la waayo heeshiiska ku xusan xarafka (b), habka ay qorayaan Heshiisyada ka dhexeeya Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed iyo Dalka uu Maalgeliyuhu u dhashay;
   j) ama, haddii la waayo Heshiisyada ku xusan xarfaha (b) iyo (t), habka uu qorayo Axdiga Xallinta Khilaafaadka Maalgelineed ee ka dhexeeya Dawladda iyo Muwaaddiniin Dalal kale, kaasoo ay Soomaaliya dhinac ka tahay, sida uu qorayo Sharciga lambar 11 ee 1967.

2. Haddii la waayo Heshiisyada iyo Axdiga ku xusan xubinta koowaad ee Qodobkan, khilaafaadkaas waxaa lagu xallin karaa in la adeegsado dhexdhexaadinta. Markaas waxaa la dhisayaa Guddi dhexdhexaadin ah oo ka kooban laba xubnood oo ka kala wakiil ah dhinacyada iyo xubin saddexaad oo Guddoomiye u noqota oo ay wadajir u magacaabaan labada xubnood oo la soo sheegay. Haddii lagu heshiin waayo magacaabidda Xubinta saddexaad soddon casho gudahood, laga billaabo maalinta la magacaabay xubinta labaad, Shir—guddoomiye waxaa dooranayo Guddoomiyaha Maxkamadda

Sare ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ka dib markuu weydiisto dhinacyada midkood. Guddiga dhexdhexaadintu wuxuu degsnayaa nidaamka uu ku shaqaynayo iyadoo aysan ciriirineyn nidaamka ay qorayaan Xeerarka Habka Maddaniga iyo Ganacsiga marka laga reebo qodobbada la xiriira damaanadda sasaasiga ah iyo mabaadii'da Qaranka. Guddigu wuxuu xaqiijinayaa in qilaafaadka deg deg loo dhammeeyo. Go'aannada Guddiga waxaa lagu gaarayaa cod hal dheeri ah, wuxuuna noqonayaa mid kama dambeys ah loona fulin karo sida xukun kasta oo kale ee kama dambeys ah. Guddiga dhexdhexaadinta ayaa go'aan ka gaaraya cidda qaadeysa kharashka dhexdhexaadinta.

Qod. 20aad

*(Faa'iidooyinka Maalgelinta Shisheeye ee jirta)*

1. Maalgelinta shisheeye ee hadda ka jirta Dalka ee lagu diiwaangeliyey Shuruucda ku saabsan Maalgelinta Shisheeye waxaa u soconayaa xuquuqda iyo waajibaadka lagu siiyey Shuruucda la xusay.
2. Maalgelinta shisheeye kor ku xusan waxay ka faa'iideysaneysaa, haddii uu Maalgeliyaha shisheeye door biddo, axkaanta Sharciga cusub, haddii shuruudihii diiwaangelinta iyo axkaanta Sharciyadii hore la dhowray, Maalgeliyuhuna keeno caddeymo qoraal ah oo sidaas muujinaya laguna kalsoonaan karo. Haddii ay sidaas u dhacdo, Maalgeliyaha shisheeye wuxuu Guddiga weydiisan karaa diiwaangelin hoos imaaneysa Sharciga cusub 180 maalmood gudahooda laga billaabo taariikhda Sharciga cusub la soo saaray.

Qod. 21aad

*(Maalgelinta shisheeye ee aan Sharciga khuseyn)*

Axkaanta Sharcigan laaguma dhaqayo Maalgelinta shisheeye ee la xiriirta baarista macdanta iyo hawlaha soo saaridda macdanta oo ay ku jiraan kuwa la xiriira warshadaha batroolka iyo quwadda nukliyeerka. Maalgelintaas waxaa lagu dhaqayaa Sharciga baarista iyo soo saaridda macdanta iyo Xeer-nidaamiyaha Macdanta iyo Heshiisyada ay isla galeen Dawladda Soomaaliyeed iyo cidda ka dan leh.

Qod 22aad

*(Waajibaadka ka warbixineed dhaqdhaqaaqa Maalgelinta shisheeye)*

Bankiyada, Notaayaasha Guud, Hay'adaha Dawladda ee shaqada ku leh Maalgelinta shisheeye waa in ay Guddiga ku wargeliyaan wixii dhaqdhaqaaq macaamileed ee ay la yeeshaan, 30 maalmood gudahooda, laga billaabo maalinta dhaqdhaqaaqaas macaamileed la sameeyey. Arrintan waxa ay la xiriirtaa arrimaha ay ka mid yihiin dhismaha shirkadaha iyo mashaariicda, amaah ka qaadashada Hay'adaha Lacagta ee Gudaha ama Dibedda, xawilaadda macaashka iyo dibad u wareejinta maalgelinta.

Qod. 23aad

*(U hoggaansanaan la'aanta axkaanta Sharcigan)*

U hoggaansanaan la'aanta Axkaanta Sharciga waxa ay Maalgeliyaha shisheeye badeysaa waayatiin xuquuqda uu ku heli lahaa Sharcigan.

Qod. 24aad

*(Ka faa'iideysiga shuruuc cusub ee daneyneysa)*

Qodobbada Sharcigan marnaba kama reebeyso in Maalgeliyaha Shisheeye ka faa'iideysto qodobbada u daneynaya ee shuruucda la soo saari doono.

Qod. 25aad

*(Xeernidaamiye)*

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya marka uu arko talada Guddiga Maalgelinta Shisheeye, dhegeystana Wasiirka Qorsheynta Qaranka, arkana go'aanka Golaha Wasirrada, wuxuu soo saarayaa Xeer-hoosaad si habsami ah loogu meelmariyo Sharcigan.

Qod. 26aad

*(Tirtirid)*

Waxaa la tirtiray sharci kasta oo aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 27aad

*(Dhaqangelin)*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 cisho ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Maajo 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)